News Release

SEA Seattle-Tacoma International Airport

Sii Deynta Degdega ah

La xiriir: Perry Cooper, SEA Airport
Cooper.p@portseattle.org 206-787-4923

# Grant Program waxay abaalmarisaa in ka badan $226k oo la siiyo Ururada Dagmada South King si ay u Horumariyaan Bee'ada

**SEATTLE –** Dakadda Seattle waxay lix urur ku abaalmarin doontaa $226,631 oo ay bulshadu hogaamiso mashaariicda horumarinta bee'ada ee bulshooyinka ku xeeran Madaarka Caalamiga ah ee Seattle-Tacoma (SEA). Kani waa Barnaamijka Deeqaha Bee'ada ee Sanduuqa Saamaynta Bulshada Degmada South King ee wareegga afraad Sanduuqa Saamaynta Bulshada ee Dagmada South King. Tan iyo markii sanduuqa la aasaasay, ku dhawaad $7.2M ayaa loo ballan qaaday 44 ururro aan faa'iido doon ahayn muddo afar sannadood ah oo katirsan Dagmada South King iyo ururada bulshada ku salaysan.

“ Deeq bixiyayaasha Sanduuqa Saamaynta Bulshada ee South King County waxay bulshooyinka u dhow Madaarka SEA u samaynayaan tallaabooyin dhiirigalin leh, iyagoo wax ka qabanaya dul-duleellada adeegga ee muddada dheer, fududaynta iskuxirka dadka deegaanka iyo fursadaha shaqo, iyo qaadashada mashaariicda bee'ada,” **sidaa waxaa yiri Guddoomiyaha Dakadda Seattle Xamdi Maxamed.** Maalgalintan waxay tusaysaa sida ay nooga go'an tahay inaan noqono daris madaar wanaagsan islamarkaana maalgashta kobaca dhaqaalaha bulshada.  Waxaan aragnay saameynta qotada dheer ee dhex dhexaadinta ururada bulshada waxaana u heellan nahay inaan dhidibada ustii taagno iskaashigan."

"Mu'asasada Shyan Selah waxay ku faraxsan tahay inay sare u qaaddo ku xirnaanshaha barnaamijka Dabeecada iyadoo loo marayo taageerada deeqsinimada leh ee Sanduuqa Saamaynta Bulshada ee South King County Barnaamijka Deeqaha Bee'ada," **sidaa waxaa yiri Candice Richardson, Madaxweyne ku xigeenka Mu'asasada Shyan Selah oo Ku xiran Maareeyaha Barnaamijka Dabeecadda.** “Haysashada lacagtan, waxay awood noo siinaysaa inaan iskaashi la samayno mid kamid ah dugsiyada aan wada shaqaynta la leenahay, Federal Way Public Academy, mudada saddexda sannadood ah ee qurxinta dhulka dugsiga. Hannaankani waxa uu ku lug leeyahay in ardadu kaqaybgalaan waxqabadyo qoto dheer oo kobcinaya waxbarashada bee'ada, iyadoo la siinayo khibrad gacmeed ah oo qiimo leh oo ku saabsan dhirta iyo beerta. Marka laga soo tago dhinaca waxbarashada, dadaalkeenna waxa uu gacan ka gaysan doonaa dibu soo noolaynta goobtan dugsiga dadweynaha taasoo aan faa'iido u lahayn ardayda oo kaliya, balse sidoo kale kobcinaysa xiriirka bulshada deegaanka ee la arki karo mustaqbalka dhow."

Iskaashiga ku saleysan sinnaanta ayaa awood u siinaya ururada si ay uga qaybgalaan bulshooyinka deegaanka arrinta ku saabsan sii jiritaanka bee'ada, iyo mashaariicda la doortay waxay ujeedadoodu tahay in la hagaajiyo bee'ada iyo helitaanka meel cagaaran. Bulshooyinka ku nool South King County waxay la kulmaan saameynno deegaan oo aad u ballaaran sababo badan oo kala duwan awgood, oo ay ku jiraan taariikh dheer oo ku saabsan sinnaan la'aanta isticmaalka dhulka iyo barakaca dhaqaale ee ku khasbay bulshooyinka la haybsooco koonfurta aadka u fog.

Marka laga soo tago lixda urur ee lacagta ku helay wareeggan afraad, 15 urur ayaa sii wadaya shaqada mashaariicda bee'ada ee Burien, Des Moines, Federal Way, Normandy Park, Seatac, iyo Tukwila iyadoo loo marayo barnaamijka xulashada maalgalinta sannadaha badan.

## Qaatayaasha

***Mu'asasada Shyan Selah*** waxay qaban doontaa barnaamijka Ku xidhnaanshaha Dabeecadda ee loogu talagalay in loogu adeego ardayda dhigata Dugsiyada Dadweynaha ee Federal Way, mid kamid ah dugsiyada ugu kala duwanaanshaha badan ee gobolka Washington. Barnaamijku waxa uu ardayda siin doonaa tababarro ku saabsan beerista, beeraynta, iyo waxbarashada bee'ada iyadoo la nadiifinayo oo dib loo soo celinayo jardiinnada iyo meelaha bannaan ee Federal Way. Mashruucan waxaa lagu maalgaliyay lacag dhan $57,302.40.

***<u>EarthCorps</u>*** waxay la shaqaynaysaa Magaalada Burien, saaxiibada bulshada (ay ku jiraan Partners In Employment, Washington Conservation Corps-WCC, barnaamijyada dugsiga ka dib, iyo Green Burien Day), iyo tabaruceyaasha si ay u soo celiyaan oo ay u maamulaan Hilltop Park, 7.4-haktar oo bannaan oo ku taal Xaafada Boulevard Park. Mashruucan ayaa ka dhici doona magaalada Burien waxaana lagu maalgalinayaa lacag dhan $60,000.

***Falcelinta SR3- SeaLife, Dhaqancelinta, iyo Daraasadda*** waxay kaqaybqaadan doontaa dhagaystayaal badan oo kala duwan ilaalinta bee'ada badda iyo xayawaannada hoyga u ah. Tani waxaa lagu fulin doonaa iyadoo loo marayo munaasabadaha nadiifinta xeebaha ee sanadlaha ah si looga saaro qashinka xeebta Des Moines iyo sidoo kale iyadoo loo marayo barnaamijka Mammal Stewards ee Marinka kaasoo bari doona xeebta deegaanka ee ku saabsan duurjoogta badda kuna dhiirigaliya inay ilaaliyaan deegaan xeebeedka aan wadaagno. Mashruucan ayaa ka dhici doona Des Moines waxaana lagu maalgalin doonaa lacag dhan $22,384.

***Dugsiga Sare ee Foster Environmental Science Program***wuxuu ballaairn doonaa beerta bulshada ee jirta ee Dugsiga Sare ee Foster kaasoo ay maamusho Naadiga Beerta ee labadaba dugsiga sare iyo dugsiga dhexe. Ballaarinta beerta waxay siisaa khibrado badan oo gacmeed ah ardayda mawduucyada sayniska bee'ada dhigata. Mashruucan ayaa ka dhici doona Tukwila, waxaa maaliyad ahaan maalgalisay Tilth Alliance, waxaana lagu maalgaliyay lacag dhan $60,000.

***Naadiga Toros Cycling*** wuxuu ku dhisi doonaa maalgalintii hore ee Wareegga 3-aad ee barnaamijka deeqda ee mashruuca horumarinta xirfadaha baaskiilka ee Burien, gaar ahaan qaybta baarkinka aan la isticmaalin ee Annex Park. Goobtan ayaa mararka qaarkood lala beegsadaa qashin qubka, taagnaanshaha maalaa yacniga ah iyo burburinta. Maalgalintu waxay ilaalin doontaa aagga iyadoo loo marayo dadaallada nadiifinta xubnaha bulshada iyo hagaajinta calaamadaha la xiriira isticmaalka jardiinnada. Mashruucan ayaa ka dhici doona magaalada Burien waxaana lagu maalgalinayaa lacag dhan $15,395.

***Menbere Tsebaot Holy Trinity ee Kaniisadda Ortodokska Itoobiya*** ayaa kor u qaadi doonta joogtaynta bee'ada iyo quruxda bilicda dabiiciga ah ee bulshada deegaanka iyadoo dhir ku beeraysa Beerta Adelaide iyadoo loo marayo dadaalka ay u hureen mutadawiciinta xubnaha kiniisadda, taasoo iskaashi dhaw la leh Magaalada Federal Way. Mashruucani ujeedadiisu waxay tahay in uu gacan ka geysto fayoqabka guud ee magaalada iyadoo la kordhinayo meelaha dhirta leh, hagaajinta tayada hawada, iyo u abuurista dadka deegaan iyo martidaba jawi soo dhaweyn oo dagan. Mashruucani wuxuu ka dhacayaa Federal Way waxaana lagu maalgaliyay lacag dhan $11,550.

## Ku saabsan Sanduuqa Saamaynta Bulshada ee South King County

Barnaamijka Deeqaha Bee'ada waa wareegtada Sanduuqa Saamaynta Bulshada ee South King County, oo $10 milyan oo lacag ah taasoo la aasaasay 2019. Dakadda Seattle waxay aasaastay Sanduuqa Saamaynta Bulshada ee South King County (SKCCIF) si ay u horumariso iskaashiga ku salaysan sinnaanta oo ay u bixiso agab iyo taageero bulshooyinka madaarka u dhow ee taariikh ahaan aan la adeegin, wax ka qabashada dhimista buuqa, caafimaadka deegaanka, iyo waaritaanka.

Barnaamijka Deeqaha Bee'ada ee SKCCIF wuxuu sii wadaa shaqada Sanduuqa Bulshada Deegaanka ee Madaarka Diyaaradaha (ACE) ee sida aadka ah u guulaystay kaasoo ku maalgaliyay in ka badan $1,204,000 37 mashruuc bee'ad oo ay bulshadu hogaaminayso ilaa 2017.

Sannadkii 2019-kii Dakaddu waxay sidoo kale abuurtay cudud ka soo kabasho dhaqaale sanduuqa si ay uga caawiso soo kabashada masiibada. Maalgalinta soo kabashada dhaqaalaha ilaa hadda wadarta $3 milyan oo doolar, oo lagu maalgaliyay macaash doonka ee South King County ee maxalliga ah iyo CBO-yada.

## Maalgalinta Sannadaha-badan

Maalgalinta sannadaha badan waxay kordhisaa saamaynta maalgashiga bulshada ee Dakadda waxayna caawisaa inay taageerto qorshaynta iyo hirgalinta mashruuca waara. Wareeggan afraad, Dakaddu waxay sii waddaa inay siiso codsadayaasha abaalmarinno sannado badan mashruucyada socda hal, laba, ama saddex sannadood ilaa $20,000 sannadkii iyo ilaa $60,000 maalgalin sannado badan ah.

## Ololeynta waxay ku guulaysataa 2:1 qaanuunka isku aadka

Ilaa 2023, sharciga gobolku wuxuu u baahan yahay in mashruucyadu ay buuxiyaan shuruudaha u dhigma ee isku aadka 3:1 si ay u helaan lacag. Dhowr sano ayay dakaddu samaysay hindise sharciyeed si loo dhimo shuruudaha isku aadka 3:1 ee mudnaanta sare leh. Inta lagu jiro wareegga sharci dajinta Gobolka Washington ee 2023, oo ay kafiil ka qaadasho ka helayso Wakiil Clyde Shavers iyo Wakiil Tina Orwall, iyo u ololeynta hadda ee Guddiga Dakadda Seattle Xamdi Maxamed, Dakaddu waxay si guul leh ugu ololeysay dhimista isku aadka maxalliga ah ee codsadayaasha aan macaash doonka ahayn ay tahay inay ku bixiyaan SKCCIF ilaa 2 :1. Isbaddalkani waxa uu dhimaa culayska saaxiibada abaalmarinaha ah waxaana uu kor u qaadayaa awoodda Dakadda ee ay kula heshiiso ururada bulshada ku salaysan, kuwa aan macaash doonka ahayn, ururada, iyo kooxaha mutadawiciinta ah ee samaynaya horumarka dadweynaha ee bulshooyinka ku dhow madaarka.

Dakaddu waxay bixisaa dhawr siyaabood oo lagu kulmo isku aadkan, oo ay ku jiraan wakhtiga iskaa wax u qabso, saacadaha xiriirka lala yeesho ka qaybgalayaasha munaasabadaha guud, saacadaha waxbarashada, qiimaha bee'ada ee geedaha la beeray, dhimista qiiqa kaarboonka, tabarucaadka noociisa ah, tabarucaada saaxiibada mashruuca, iyo deeqaha lacageed.

**Ku saabsan Madaarka Caalamiga ah ee Seattle-Tacoma**
*Waxaa maamula Dakadda Seattle, Madaarka Caalamiga ah ee Seattle-Tacoma (SEA) waxay u adeegtaa dadka Pacific Northwest adeegyada muhiimka ah, marin u helka boqollaal goobood oo gudaha iyo caalamka ah, iyo dhaqdhaqaaq dhaqaale oo taageera tobanaan kun oo shaqo abuur oo soo saara $20 bilyan ku soo saara waxqabadan dhaqaalahan. Sannadkii 2023, sanadkii labaad oo isku xigta, SEA waxay kasbatay warshadaha safarka ee* ***4-ta Xidig laha Madaarka Skytrax iyo magacaabista Madaarka ugu Fiican ee Waqooyiga Ameerika****, oo diirada saara safarka macaamiisha udub dhexaadka u ah ee leh adeegyo, tashiilaad, iyo adeegyo ka wanaagsan. SEA ayaa wadar ahaan kor u dhaaftay 50.8 malyun oo rakaab ah sannadka 2023 – oo hoos uga dhacay 1.8% sannadkii 2019 – iyadoo la saadaaliyay in ay dhaafi doonto tirada dadka safarka ah ee faafaya kahor sanadka 2024. 35 diyaaradood ayaa u adeegay 93 duulimaad oo aan joogsi lahayn iyo 30 goobood oo caalami ah oo ay ku jiraan Canada, Mexico, iyo hawlgallada xilliyada.*

*Wixii macluumaad intaas ka badan oo ku saabsan madaaradeenna ugu sarreeya ee U.S., booqo [www.flysea.org](http://www.flysea.org) oo naga raac barta Twitter, Facebook, iyo Instagram.* ***Maalin walba. Kor u qaad.***

###